# MAGANGALYADA
# Hangari

## Tixraacaha ajaanibta u baahan daryeelka

- Side lo dalbada magangalyada?
- Maxa dhacaya inta lgu guda jira dalabka magangalyo?
- Sharci nuuce ah bad ka helaysa dowlada Hangari hadi ad u bahantahay magangalyo?
- Halkee baan u doonan kara cawimaad?



Hungarian Helsinki Committee

UNHCR
The UN Refugee Agency

## 1. Xaqaa iq asaasi ah

Hada waxa ku sugantahay dowlada **Hangari** *(Magyarország)* tirakobkodu wa 10 milyan, luqadoduna wa hungrain *(magyar)*. Wa wadan xubin ka ah wadamada la isku yirahdo midowga yurub (EU), kuna yaala dhexda bariga yurub. Halkan ka arag qarirada wadanka Hangari dhamaadka buugan.

**Ajnabi walba wxa uu xaq u leyahay inu ka dalbada magangalyo halkan tas oo ku salaysan sharciga Hangari iyo midka calamiga ah ba.hadi aad la so kulantay cadaadis, rafaadis ku tumasha xaquuqdada ah wadankaga, masuuliyinta hangari kuguma celin karan halkaas.**

Qoraalkan waxa uu ka koban yahay waxbixio asaasi ah iyo daliilka ama tusmada sida ad u gudbin lahayd howshada magangalyo doon. Hadi aad u baahantahay talooyin dheerad ah ama adan fahmin wax yabaha qaar, ka dalbo cinwaanada lacag la.anta ah sida qareenka ama u adeegaha bulshada, kala xarir warbixinada boga 13, 15.

Marka waxa jiro qeyb sualo iyo jawabo ah, dhamadka qeyb walbo ee dukumentigaan kuwas oo ka cawinaaya sidi aad uga jawabi lahayd su•alaha la xariira howshada magangalyo.

## 2. Kuma xaq u leh in lagu ilaaliyo Hangari?

Haddii xaldada ay u dhiganto mid ka mid ah qaybaha soo socdo, waxa xaq u leedaay, ilaalo iyo jogitaan sharci ah Hangari.

- **Qaxooti** *(menekült)*: Qofka cabsanayo ayna jirto wax cadayn ah in lagu wax yeeleyay wadankiisa sabatana ay tahay diintiisa, dhalashadiisa, fikradiisa siyasadeed, ama ka tirsanantisa urur bulshadeed oo gaar ah.
  - — Dhibatada waxa laga wadaa ku tumashada xuquuqda bina aadanka, tusale ahaan cadabid bini adan, xasuuq ka baxsan dhanka bini adanimda, kufsi ula kac ah ama ka soo cid la geysto
  - — Haddi ay ku haysato dhibaato, ama adan ku haysan ilaalo wadankaada sababtuna ay tahay in aad nag tahay ama, labeeb (qanis) ama aad leedahay sifaad aan la badali karin (ama aadan rabin in aad qariso sifadkaas) waxa lagugu xisabin kara bulshada. Qareenkagana ku siin kara talooyin badan**.**
- **Ilaalo fariciyeed** *(oltalmazott):* Qofka ku jiro halis dhab ah kana cabanayo cabanayso wax yelooyinka soo socdo oo aysan sababtoodo ahayn diintiisa, dhalashadiisa, ama fikradiisa siyasadeed,
  - — Daldalid
  - — cadabid, si binadanimo ka baxsan ula dhaqmid, ciqaabid.
  - — si halis ula dhaqmid nafta shacbka,ama qofka sababto ah ay jirto cunfi aan kala socid la hayn iyo iska horimaad hubaysan. Tusaale ahan (wadankaada oo dagaal sokeeyo ka jiro).
- **Jogitaan haysasho** *(befogadott)*: Qofka ka cabsanayo wax yeleen, in la cadaabo, ama si biniadan ka baxnimo loo la dhaqmo, ama la daldalo, kaas oo aan helaynin sharciga qaxootinimada, ama ilaala farciyeedka, tusaale ahaan (gaysasho fal danbiyeed halis ah).
- **Jinsiyad ama dhalasho** *(hontalan)*: Qofka aan la hayn jinsiyad ama dhalasho. Su aashan waxa loo bixiyey si gooni ah, kuma na jirto howsha magangalyo, haddii aad rabto in aad dalbto sharcigaan waydiiso kaalmo hay·ada Hungarian Helsinki Commitee kala xariir warbixitooda boga 13, 15.

? **La igama handadi doono ama waxyeleendono xaga dowladayda, lakinse dhan qofkale ama guruub kale, ama cidayda, ama xisbi siyasadeed, ama urur argagixiso, taasi wax ma badalaysaa?**

Maya, wali waxaad tahay qaxooti, muhiim ma ahan in laga waax yeeleeyo dhanka dowlada.

? **Ilaalo ma ku heli karaa Hangari haddii ay tahay sababta aan wadankayga uga soo tagay faqrinimo, ama aan ka wayey Janis shaqo ku helo?**

Maya, haddii aysan sii jirin sababkaloo sii cayiman aan tan ahayn. Dhaqaalo xumo, arimo cimila darted oo ka jiro wadaankaada, kama dhigayso cadi ahaan in aad hesho ilaalo caalami ah.

## 3. Halkeee iyo side u dalban karaa magangalyo?

- **Halkee**: sida ugu dhaqsiyaha badan uguna macquulsan ula xariir xafiiska waaxda socdaalka iyo dhalashada (*Bevándorlási és Állampolgársági Hivatal, BÁH)* – waydiisana magangalyo haddii ad ka baqanayso waxyeelo halis ah dhanka xaquuqda bin aadanka – haddii aad labato ama la guu celiyo wadankaada. Waxaad kala xariiri kartaa waaxda socdaalka tusaale ahaan areyadaan hoos ku qoran.

  - **Xafiska waaxda socdaalka, Qaybta qaxootiga** *(BÁH Menekültügyi Igazgatóság)*
    Cinwanka: 1117 Budapest, Budafoki út 60.
    Tel**:** 06 1 463 9170 • Fax: 06 1 463 9108
    Website: www.bm-bah.hu • E-mail: menekult@bah.b-m.hu

  - **Békéscsaba kaamka qaxootiga** *(Békéscsabai menekülttábor)*
    Cinwanka: 5601 Békéscsaba, Kétegyházi út 10.
    Tel: 06 66 452 507, 06 66 452 617 • Fax: 06 66 445 462

  - **Debrecen kaamka qaxootiga** *(Debreceni menekülttábor)*
    Cinwanka: 4033 Debrecen, Sámsoni út 149.
    Tel/fax: 06 52 413 517

  Waxaad u dhiibi kartaa dalabkaada magangalyanimo askarta **booliska** *(Rendőrség)*, sidoo kale haddii aad ku jirto xabsi ama danbi, ama danbiile aad tahay ama lagu daba jiro, ama ay ku haysato sabab kale oo adan ula xariiri Karin waaxda socdaalka.

- **Sidee**: Ma jirto qaab gooni ah oo cayiman, balse waxaad magangalyada u waydiisan kartaa waaxda socdaalka qaab qoraal ah ama oraal **luqada uu robo** ha ahaadee, taasina waxa aad muhiim u ah codsigaada magangalyada in uu ahaado mid uu fahmi karo masuulka ka socdo waaxda socdaalka oo aad la hadlayso. Caadi ahaan, haddii aad dalbato magangalyo si oraal ah kaliya ah balse dib ayaa laga waydiin donaa in aad qorto. La soco badanaa masuuliyiinta booliska in ayasan ku hadlin wax luqada ajanabi ah badanaa.

**Haddii aad ka baqanayso in uu masuulka u san ku fahmin dalabkaga magangalyo si cad ama wadix ah waxaad ku dhahdaa kaliya erayadaan "MENEKÜLT" (qaxooti) ama "MENEDÉK" (magangalyo). Ku dheh hangariyaan erayadaas waxadna racsiisaa qoraal luqadaada hooyo, wana in aad saxiixdaa qoraalkaas adiga laf ahaantaada.**

? **Ma codsan karaa maganglayo Haddii an ku joogo ama aan ku soo galay wadanka Hangari si sharci daro ah?**

Haa, qaxootiga badankoodo ma lahan wado ay ku helaan ilaalo oo aan ka ahayn in ay ku soo galaan si sharci daro ah wadanka badbaada (ayago isticmalayo dukumintiyo bug ah ama basaboor la·aan ama viso la·aan). Ayadoo an laguu tixracaynin sida sharci darada aad ku soo gashay wadan ka Hangari, haddii ay waaxda socdaalka aay u aragto in aad mudantahay sharciga qaxootinmo, ama daryeel farciyeed, ama ogalaasho jogitaan, joogitaankaada wadanka Hangari wuxuu noqonayaa mid sharci ah.

**Haddii aad kus soo gasho wadanka Hangari si sharci daro ah (sida dukumenti bug ah ama viso ama basaboor la·aan) aadna rabto in aad dalbato magangalyo waxa aad muhiim u ah in aadiga sida ugu dhaqsiyabadan kula xariirto waaxda socdaalka ama booliska, isla markaasina aad u shegto in aad dalbanayso magangalyo ayna dukumintiyadaduna yihiin kuwa bug ah oo an sax ahayn.**
**Haddii ay surta galtahay xataa tusi masuulka waaxda socdaalka ama booliska dukumintigaga dhabta sida ugu deg degta badan uguna macquulsan, haddii aad lacala xata ku soo gashay travel dukuminti bug.**

? **Ma dalban karaa magangaloyo haddii aan xabsi ku jiro ama meel ku xeranahay?**

Haa, xaldana oo kale waxaad u dhiibi kartaa dalabkaada magangalyo wardiyayaasha xabsiga ama booliska.

? **Ma diidi karaan wardiyayaasha xabsiga ama booliska in ay diwaan galiyaan dalabkayga magan-galyo?**

Maya, waxay ku qasbanyihiin in ay usii gudbiyaan dalabkaada magangaloyo xafiiska waaxda socdaalka. Haddii ay diidaan la xariir Hungarian Helisinki Committee ama qaramada midowbe lanta qabilsa qaxootiga oo lo yaqana markii la so gabiyo qaramada midobay qaybta qaxootiga waxadkala xariiri kartaa boga 13, 15, 16.

? **Imisa jeer ayaan waydiisan karaa magangalyo wadanka Hangari?**

Haddii la diiday dalabkaagii magangalyo, wa dalban kartaa, iyo xaalado gaar ah, wali gudbi dalab cusub lakin waa in aad ka warqaabtaa arimahaan so socdo.

— Ma noqon doono dalabkaada cusub ee magangalyo mid la aqbalayo haddii adan ku tilmaamin ama sheegin arimo muhiim ah iyo daruufo jiro oo cusub oo aadan horay ugu xusin howshada dalbkigi magangalyo ee hore tusaale ahan (xaalada wadanka aad u dhalatay ama xaladahaada shaqsiyeed ayaa is badalay laga soo bilaabo markii aad howsha dalabkii magangalyo ee hore aad dalbtay).

— Haddii aad soo gartay ama aad joogtay wadanka Hangari si sharci daro ah, aadna ku guul daraysatay howshi labaada ee magangalyo doonka ahayd, dalbashadaada sedaxaad ee magangalyo dooninimo ma noqon doonto caqabad kugu sababta in laga eryo jogitaanka wadanka Hangari.

? **Halke waydisan karata magangalyo garoonka dayuuradaha dhexdiisa?**

Haa, haddii aad ka soo gasho wadanka Hangari dhanka garoonka dayuuradaha ee caalamiga ee Budapest, waxaa aad muhiim u ah in aad la xariirto askariga amar bixiyaha ee garoonka sida ugu macquulsan ee ugu dhaqsiyaha badan waydiisana magan galyo, xaldaan waxay noqonaysaa in booliska uu war galiyo xafiiska waaxda socdaalka lana socod siiyo dalabkaaga magangalyo doonimo,badanaana waxay noqon doontaa in aad joogto qol xiran ee ku yaalo garoonka dhexdiisa qaybta taransitka ilaa mudo malmo ah.

? **Haddii aan wada socono aniga iyo reerkayga ma waxaa wada dalbanaa magangalyo isku jirto ama mid kala baxsan.**

Ha, (wixii ka wayn 18 sano jir) waxay dalban karaan mid ka gooni ah kan xaaskooda ama nagtooda balse waxaa micno ama dareen wayn samaynaya in dalabka maganlyo doonka ee reerka oo dhan in uu isku ahaado mid qura ah, (caruurta ka yar 18 sano jir) oo si wada jir ah ula yimaado dadka ka wa weyn ee reerkooda ka tirsan sida (walidiintooda, ama walidiintooda wixii sii dhalay iyo wixii la mid ah), ma dalban karaan dalab magangalyo oo gooni ah waa se in ay kula jiraan dalabka dadka reerkooda ka tirsan.

## 4. Maxaa xaq ah oon aan leeyahay inta aan ku guda jiro howsha magangalyo doon?

Inta lagu guda jira howsha dalbashada magangalyo wa inad qorota sedan:

- Inta lagu gudo jiro gabi ahaan howsha magan galyo doon waxaad xaq u leedahay in aad adaygsato waxa soo socdo.
- In aad adaygsato luqadaada hooyo ama luqad kale oo aad si fiican u fahmayso (koleyba waxaad heli doontaa tarjumaan haddii ay daruuri tahay).
- In aad hesho tarjumaan aad isku luqad tihin kaso rag ah hadii aad rag tahay ama dumar hadii aad dumar tahay (haddi ay macqul tahay aad u bahantahay).
- In aad hesho u qaybsane magangalyeed oo luqadada ah (haddii ay dhibatooyinka aad ka baqanayso ay la xariiraan dhanka jinsiga, qaab jinsiyeedka aad tahay, iyo haddii sidaa lagaaga si codsado.
- Wa in ad hesha koobi ah go·amadi lagaga garay kas oo ah mud ku qoran luqada Hangari.
- In lagula socodsiiyo wax yaababa uu ka koobanyahay ayado la fiirinayo natiijada howsha magangalyo donimadaada ee luqadaada hooyo ama luqad kale oo aad si wacan u fahmayso.
- In aad hesho cawinaad qareemeed oo bilaash ah, ama aad ka hesho hay, ad aan dowli ahayn. Waaxaad ka arki kartaa meelaha aad kala xariirayso boga 13, 15.
- Kala xariir xafiiska qaramada midobay qaybta qaxootiga (UNHCR) ee Budapest. Waxaad ka heli kartaa meelaha aad kala xarirayso boga 16.

> **Waxaad iska hubisaa in tarjumaanka isku fahmaysaan si dhib la·aan ah, waxaa dhici karto in tarjumaanka uu ku hadlayo lahjad ka yara duwan luqadaaada, ama dhawaqiisa kugu adagyahay in aad fahanto.**
> **Waxa laga rabaa mutarjimiinta in ay u dhaqmaan si dhexdhexaad ah inta lagu guda jiro howsha magangalyo doonimo, xaqna u ma lahan in su·aalo dhankooda ah ay waydiiyaan qofka magangalyo doonka ah, ama ay isku dayaan in aad la laabato dalabkaada magangalyo dooninimo.**
> **Haddii ay ku hayso is fahan daro ama ku qancid la·aan oo aad ka shakisantahay in mutarjimka uu san ahayn dhexdhexaad, usheeg sida ugu deg degta badan u qaybsanaha arintaada, ama qareenkaada waydiiso dalbana tarjumaan kale.**

Qareenkaada ku (matalahaada dhanka sharciga) ya kaa caawin karo dhanka howshaada magangalyo sidoo kalena ku qaban karo:

- Soo xaadiro, kuna waydiiyo su, aalo sameeyna kara qudabo kooban waraysiga ay kula yesheen, masuuliyinta, ama maxkamada.
- In uu ku aqriyo kaagana sameeyo koobi dhamaan dukumintayadii loo adegsaday howshadii magangalynimo doon.
- In uu ku soo waco ama ku soo qoro warqad ama ku soo booqdo (haddii ad lacala xitaa ku jirto xabsi).

? **Xaq ma uleeyahay in aan joogo Hangari inta lagu guda jiro howsheyda magangalyonimo doon haddii aan lacala xataa ku soo galay ama ku joogo si sharci daro ah?**

Haa, waxaa kaliya oo lagaa burin karaa wadanka Hangari markii la diido dalabkaada magangalyo doonimo laguna diido go·aan kama danbees ah oo ka soo baxo waaxda socdaalka ama maxkamad haddii aad racfaan ka qaadato. Si kastoba ha ahaatee hadii aad horey u gudbisato dhawr jeer dalab maganlayo doonimo, waxaa lagu tixgalin doona howsha magangalyanimo eelabadii dalab ee ugu horeysay.dalabkaada magangalyanimo ee sedexaad muddo dheer kama sii mancin doono in lagaa buriyo jogitaanka wadanka Hangari.

? **Waxaan xaqiiqsaday in ay jireen dhibaatoyin dhanka tarjumaada intii aan ku guda jiray waraysiga (ama tarjumaanka in uu u tarjumay wax yaabaha qaar si qaladan ama ma anan fahmin waxyaabaha qaar ah) laakin malmo ama asbuucyo ka dib ayaan xaqiiqsaday marka maxaan samayn karaa?**


Markii aad saxiixaysay waraysiga diwaan galintiisa markii uu ku dhamaday waraysiga ayaa waxad kaloo saxiixday in aad ku racsantahay waxa uu ka koobanyahay waraysiga, taasi waxay u dhigantaa in ay aad u adkaan doonto in aad gadaal ka cadayso in ay jirtay in ay jireen xogaa is fahan daro ah ama qalad xag tarjumaanka ah marka u dhagayso si taxadar leh markii diwaan galinta laguu aqrinayo dhamaadka waraysiga, marka waa in aad shegtaa isla markii haddii ay jiraan wax dhibaatooyin ah (lacala xataa haddii ay yihiin qaladaad yar).

## 5. Howsha qabilitaanka

Howsha magangalyo raadisk waa labo qaybood. Mida hore waa howsha qaabilaada iyo dhamaystirka howshada.

Markii haddii aad waydiisato Hangari magangalyo, ugu horeyntii waxaad maraysaa waxa loo yaqaano howsha qabilaada *(előzetes vizsgálati eljárás)*. Ugu horaynta howsha magangalyada waaxda socdaalka wali ma ayasan samaynin radis in aad la si gardaro ah laguu cadadin doono ama falal bina aadan nimada ka baxsan lagula kici doona haddi aad u laabto wadankaada hooyo.

Sawirkaan waxaa uu kugu kalmaynayaa sharaxaada sida ay u shaqayso howsha qabilitaanka:




Howsha qabilitaanka caadi ahaan waxa ay qadataa **15 cisho**, ka dib markii aad dalbatay magangalyda, xaladaha qaar wa ay ka badan kartaa haddii la dheereeyo waqtiga u go·anka soo baxayo (fiiri boga 7, 9).

Hadii aad ka dalbato magangalyada garoonka diyuuradaha (fiiri boga 4) waaxda socdaalka waa in ay ku dhamaysaa howshaada qabilitaan muddo **8 cisho** ah.

### A. "HOWSHA DUBLIN"

Gudaha midowga yurub wadan qura ayaa ka howl gali kara arinta magangalyo donimada. Badanaa wadaankaas waa wadankii ugu horeeyey ee uu soo galay qofka magangalyo doonka ah sidaa daradeed howsha qabilitaanka dhexdeeda, xafiiska waaxda socdaalka ugu horeyn waxa ay hubinayan wadankee baa ka masuul ah in uu darso dalabkaada magangalyo. Taasi waa waxa loogu yeero **howsha Dublin**.

Howshaan waxay dhacdaa haddii xafiska waaxda socdaalka ay u maleyaan in aad mar hore magangalyo ka dalbtay ama aad ka soo safaratay mid ka mid ah wadamada so socdo:


| | | | | |
|---|---|---|---|---|
| Austria | Engriska | Iceland | Iswitzerland | Malta |
| Belgem | Estonia | Ireland | Jeega | Norway |
| Boland | Finland | Islofakia | Jermalka | Qubrus |
| Bortaqiska | Faransiska | Islovenia | Latvia | Romania |
| Bulgaria | Greega | Ispain | Lithuania | Talyaaniga |
| Denmark | Holland | Isweden | Luxemburg | |

La soco in Iceland, Norway, Iswitzerland, ayasan xubno ka ahayn wadamada la isku dhaho midowga yurub, laakin wali waxa ay ka tirsanyihiin (nidaamka Dublin).

Badanaa hirgalinta waxay dhacdaa marka:

- Marka ay ogaadaan masuuliyiinta in faro lagaaga soo qaaday (oo badanaa lagu xareeyo shabakada macluumad is waydaarsiga ee yurub ee loo yaqaano heshiiska yurub fara la isaga qaado kunbuytarka oo yurub **"Eurodac"**) taas oo ah in aad waydiisataya magangalyo wadamadaas aan soo sheegnay ka mid ah.
- Haddii aad wadato basabor ay saarantahay viso wadan wadamadaas ka mid ah.
- Ama aad u shegtay masuuliyiinta in aad ka soo talaabtay wadan wadamadaas ka mid ah markii aad ku soo socotay Hangari.
- Waxaa kaloo jiro calaamado kale: sida in lagu arko jeebkaada lacag Swedish ah ama Paris tikitka lagu raaco diyarada midkis.

Sawirka ama naqshada waxa ay ku sharxaysa sida howsha Dublin u shaqayso Romania waa tusaale kaliya.




Marka howsha Dublin waxay qadan kartaa waqti dheer, ama dhawr asbuuc ama xataa bilooyin. Sababatoo ah waxay qadanayaa in jawaab rasmi ah laga helo wadanka kale ee ka tirsan midowga yurub.sidaa daradeed, haddii xafiiska waaxda socdaalka aay bilaabaan howsha Dublin ee arintaada, **howshaada qaabilaad waa la dib dhig doona inta ay ka dhamanayso Howsha arinta Dublin**, marka taas waxa ay u dhigantaa, in xaladaha qaar xiliga ay ku soo gabagaboobi lahayd howsha qaabilaada ay ka sii dheeran karto 15 cisho oo cadi ahaan loogu talagalay (kama danbaysta ahayd).

Marka haddii waaxda socdaalka go·aansato in wadan kale oo midaowga yurub ah uu ka howl gali doono malafkaada magangalyo, adigana aadan rabin in dib laguugu celiyo **wadankaas kale waxaad ka qadan go'ankaas racfaan**. Waxaadna ugu dhibi kartaa racfankaas waaxda socdaalka mudo **3 cisho** guduhooda racfankaadana waxaa go'aan looga qadan donaa **Maxkamada Caasimada** *(Fővárosi Bíróság)* ee Budapest waxaadna ogaata in aad ku guleysato racfaankaas in ay aad u yartahay sida

- maxkamda waxa go'aanka u qadan dontaa kaliya ayadoo firinaysa malafka qadiyadaada ma na ahan waraysigaada

- racfaankaada ma joojin in lagu celiyo, taasi waxay in xafiiska waaxda socdaalka uu ku celin karo wadanka kale ee midowga yurub ah ee qaabilnsan in uu ka howlgalo dalabkaada haddii xataa usan qaadiga gaarin wali wax go·aan ah, haddii aad waydiisato maxkamada in ay dib dhigaan celiskaada qaadiga waa u hor is taagi karaa celiskaada ilaa iyo uu go'aan ka qadanayo|qadanaso. Ogowna in ay tahay wax aad dhif iyo qaliil u ah in ay dhacdo.

Muddada rasmiga ah oo kama danbaysta oo ay maxkamada ay tahay in ay go·aan ku garto waa **8 cisho** ah xaldaas.

Markii la hergalinayana wa ay ka badataa, waxaad talo waydiisan kartaa qareemada Hungarian Helsinki Committe kala xariir fiiri boga 13, 15. Haddii aadan fahmin waxa dhacaya arinta Dublin ama aad ka baqayso in dib laguugu celiyo wadan kale oo ka mid ah midowga yurub.

### B. SHURUUDAHA KALE EE AQBALAADA

Marka xafiiska waxda socodaalka uu go·aansado in wadanka Hangari uu yahay mesha luuga howl galayo dalabkaada magangalyo, ayaad wali waxaad u sii bahantahay in aad soo buuxiso shuroodo dhawr ah ka hor inta aan loo darsin si waafi ah dalabkaada. Dalabkaada lama aqoonsandoona, si xeel dheerna lama sii guda gali doono howshiisa waana la diidi donaa haddii aad:

- Tahay muwaadin wadan ka mid ah wadamada midowga yurub.
- Haddi mar hore lagaga aqoonsaday qaxootinimo wadan kaloo ka mid ah midawga yurub.
- Ama haddii horay lagaga aqoonsaday qaxootinimo wadan kale aqoonsigaas ama sharcigaas laga siiyayna uu yahay mid wali shaqayna aadna ku laaban karto wadankaas.
- Haddii aad mar kale dalbatay magangalyo ka dib markii la diiday howshii dalabkaagi hore ee Hangari gudaheeda, dalabkaadan cusubna uu ku salaysanyahay dhacdooyinkii ama qabkii dalabkii hore (yacni wax is bedal oo cusub adan ku shegaynin).

**Waxaad mar waliba masakada ku haysaa oo aad gudbinayso dalab cusub (diidmada ka dib) waad in aad ku cadaysaa in ay jiraan dhacdooyin iyo xaalado cusub si luugu bar bar dhigo howshaadii hore.**

Haddi xafiska waxada socdalka uu go·aansado in dalabkaada magangalyo uu yahay min aan la aqbalaynin, taas ay macnaheedo tahay, bayanaadka aan kor ku soo xusanay mid ka mid ah in ay ku dabaqmayso arintaada waxad xaq u leedahay in aad go·aankaas diidmo aad ka qaadato racfaan, **wa in aad ku gudbisaa racfankaada mudo 3 cisho** ah xafiiska waaxda socdaalka racfaankaada waa in aad ku sharaxdaa waxa aad uga soo horjeedo go'aanka diidmo, tusaale haddii u san ahayn dalabkaan dalabkaagii magan galyo ee ugu horeeyey waa in aad sharxadaa duruufa iyo xaaladaha cusub (wax muhiim ah aya isbadalay ama dhacay tan ilaa iyo intii laguda galay howshaadii magangalyo ee hore, waxaajiro cadaymo cusub oo aad hayso iyo wixii la mid ah).

Racfaankaada waxaa darsi doono **Maxkamda Caasimada** ee Budapest *(Fővárosi Bíróság).*

- Maxakamada waxa go·aanka qadanaysaa ayadoo tixracayso malafka howshadada, waraysi kama qadayso, balse waxaad dalaban kartaa waraysi shaqsiyeed in ay kula samayso maxkamada (waa hadiia ad u bahantahay in aad sharaxaad ka bixo xujuuyinkaada) lakin qaadiga ma ahan in uu aqbalo codsigaada amase kuma qasbano.
- Muddada kama danbaysta ah oo ay tahay in ay maxkadama ku qaadato go·aan waa **8 cisho** markii loo firiyo sharciga lakin markii la hergalinayo waa ay ka dherataa (1 ilaa 2 bilood), haddii aad ka dalbato waraysi shaqsiyeed maxkamada **dalabkaas ayaaba sii dheranayo.**

Waxaad qareen waydiisan kartaa Hungarian Helsinki Committee si uu kaaga caawiyo qoraalka racfaanka waxaadna kala xariiri kartaa boga 13, 15.

**Howsha qabilitaanka waa la xeri donaa ama la joojin donaa haddii aad seegto waraysiga aad la leedahay masuulka ama lagu waayo ba.**

? Halkee baan joogi donaa inta lagu guda jiro howsha qabilaada?

Waxay badanaa ku xerantahay goorta iyo halka aad ka dalbato magangalyada:

— badanaa waxaad joogi dontaa inta lagu guda jiro howsha qabilaada kaamka qaxootiga ee Békéscsaba.

— haddii aad ku jirto goorta aad dalbanayso magangalyada xabsiga ajanibta ee askarta (ama xabsiga ajaanibta ee ku yaalo Győr, Kiskunhalas, Nyírbátor ama garoonka Budapest, waa in aad jogtaa xabsi int lagu guda jiro howsha qabilaada sidoo kale, haddii ad joogot garoonka dayuuradaha aan go·aana lagu garin mudoo 8 cisho gudahooda ah, waxa laguu soo wareejin donaa kaamka qaxootiga ee Békéscsaba 8 cisho ka dib.

— haddii aad ka yartahay 18 sano jir aysan kula socon qof kaa weyn oo reerkaada kuguna daryeelayo Hangari waxaa lagu soo dirayaa kaamka da,yarta ee Bicske kaamkaas oo aad ka heli doonto daryeelo iyo ihtimaamsiin gaar ah.

? **Ma ka tagi karaa kaamka inta lagu guda jiro hosha qabilaada Békéscsaba?**

Lamkaas waa kaam xerin, caadi ahaana waa in aad jogtaa inta lagu guda jiro howsha qabilitaanka, si kastoba ha ahatee caruurta waxaa loo ogol yahay in ay iskoolaka waxbarashada adaan, iyo haddii aad u baahantahay in aad aado cisbitaal, waa laguu qadi doona, la xariir maamulka kaamka ama adeegayaasha bulsho ee Ha·ayada Menedék su·aalahaada waxaad kala xariiri kartaa boga soo socdo 15.

? **Muddo intee la eg ayey howsha qabilitaanka oo soconkartaa? Maxaan wali u sii jogaa Békéscsaba ayadoo dadkii aan wada soconay muddo dheer ka hor ka bexeen?**

Waxay ku xerantahay sababta aad ugu dahday arrimo dhowr ah oo kale duwan, keesaska ugu fiican howsha qabilitaanka waxa ay ugu dhamataa muddo ka yar 2 asbuuc, keesaka ugu xun ama ugu dahida badan waxay qadan kartaa 3 ilaa 6 bilood.

Sababaha badanaa dhereeyo howsha qabilaada ayaa waxa ay yihiinn:

— Arinta Dublin, inta lagu guda jiray istaajinta howsha qabilaadada keeska asxaabtaada ma ay san ku jirin arinta Dublin sababtaasana waaye waxa keenay in ay ugu baxaan si kaa deg deg badan Békéscsaba.

— Dalabkaada waxa lagu diiday howshii qabilitaanka waxaadna gudbisatay racfaan go·aanka qabilitaanka asxaabtaada waxa uu ahaay mid ogolaasho ah ama mid diidmo ah balse ayaga ma aysan samayn wax racfaan ah.

? **Arintayda Dublin waxa ay qadanaysaa muddo dheer halka kiisaska kale ay ku soo dhamaato si deg deg ah maxaa keenay arintaas.**

Wadadama midawga yurub qarkooda waxay uga soo jawabaan codsiga Hangari si deg deg ah, halke ku wa kalena muddo kasii dheer ay qataan, nasiib xumo adiga ama xafiiska waaxda socdaalka arintaas waxba kama qabankartaan.

? **Waxaann horay u waydiistay magangalyo wadan kaloo midowga yurub ka mid ah, dalabkayga magangalyona waa laga soo diiday halkaa, maxay masuuliyeenta Hangari wali u doonayaan in ay dib iigu celiyaan wadankaasi?**

Arinta Dublin wax dhibaato ah uma aragto haddii la soo diiday howshadii. Haddii xafiiska waxaada socadaalka ay arkaan in aad horey uga dalbatay magangalyo wadan kaloo ka tirsan midowga yurub, arinta Dublin way howl galaysaa haddii xataa laga soo diiday dalabkaada wadankaas. Maskaxada waxaad ku haysaa had iyo goor in jawaab rasmi ah laga helo wadanka kale ee midowga yurub in ay qaadan karto muddo dheer xataa keesaska qaarkood.

? **Maxaan xaq u leeyahay markii la igu hayo garoonka dhanka transitka?**

Waxaad heli dontaa 3 wajbo oo cunta ah (aydoo loo igayo diintaada) hadddii aad lacag sidatana waxaad ka iibsan kartaa cuno dhayraad ah dukaamanada garoonka, waxad kaloo isticmaali kartaa mobelkaada khaaska ah, waxaad kaloo wax ka wacan kartaa taleefanka guud ee garoonka fadlan waydiiso in uu ku raaco askariga masuulka ah in uu ku raaco halkaas, sababtoo ah waxaad garoonka u jogtaa arimo ilaalin ah, hadda la taganyahay macquul ma ahan in aad u baxdo bananka oo aad so codsato ama dhaqdhaqaaq xur ah banaanka ah.

## 6. Howsha kama danbeysta ah

Markii howshaada qablitaanka ay ku soo gabagaboobdo howsha oglaasho ah waxaa loo gudbayaa *(érdemi eljárás)*. Howsha qaybtaan xafiiska waaxda socdaalka ah waxay darsayaan haddii aad u qalantahay in lagu siiyo sharci qaxootinimo, daryeel farciyeed, ama ogolaasho jogitaan ah fiiri boga 2.

Xafiiska waaxda socdaalka waraysi ayuu kula yeelan doonaa ugu yaraan hal mar (lakin waxaa lagayabaa labo ama saddex jeer in ay ku waraystaan) waraysiyadaan masuulka waxaa uu ku waydiin donaa.

- maclumaadkaada shaqsiyeed ee adiga kugu saabsan .
- sida aad ku soo gartay wadanka Hangari iyo
- sababta aad uga soo tagtay wadankaada hooyo.

Waraysiga ugu horeeyo badanaa waxa la qadayaa dhawr asbuuc ka dib marka ay bilaabato howsha dhabta ah. waxaad kaalmo ka dalban kartaa qareenka Hungarian Helsinki Committee, ka hor waraysigaada kowaad macluumaadka waxaad ka firisaa boga 13, 15.

**Kalsoonidaada ama runtaada waxay ka qadaataa kaalin libaax ah howshaan, waxaa aad muhiim u ah in aad bixiso maclumaad buuxo inta lagu guda jiro waraysigaada sababta aad kugu kaliftay in aad wadankaada ka tagto, isku day in aad muhimada aad saarto dhibaatooyinka aad kula kulantay wadankaada kuwaas oo aad uga baqayso wadankaada, iska hubi in aadan sheegin hadal iska hor imaanayo.**

Haddii adan xasuusan magic, ama meel, ama tariikh, ha abuurin maclumaad been ah, balse kaliya isku day inta macluumaad ugu badan aad una sharax masuulka ku waraysanayo sababta ay kuugu adagtahay in aad xasuusato macluumaadkaas oo kale, tusaale ahaan, haddii aadan xasuusan tariikhada dhacdo muhiim ah ay dhacday, waxad kaloo isku dayi kartaa in aad ku xerto dhacdo kale (waxay ahayd dhamaadka xili robeedkii oo kale) ama (doorashadii ka dib).

Waa in aad dhibtaa basboorkaada ama wixii dukuminti ah oo cadayn xafiiska waaxda socdaalka sida ugu deg degta badan ee ugu macquulsan, haddii adan samay,arintaas waxay samayn xun ku yeelan kaartaa tixgalinta kiiskaada,isla markaasna kuma qasbanid in aad gudbiso **dukumatiyo cadayneed** (shahaadoyin, ama go·aamo, waxyaabo, sawiro ama cadaymo kale oo wadankii aad kala timid) si aad ugu kaalmayso magangalyo dalbashadaaada,lakin haddii aad wadato waxyaabahaas waxay cadaynayaa waxa aad shegayso in ay tahay wac run ah, wayna ku kalmaynaysaa, haddii adan wali gudbidin wali dukumintiyadaas waxaad siin kartaa masuulka ku waraysanayo inta lagu guda jiro waraysigaada kowaad.

**Diwaan galinta qoraaleed** waxaala lagu diyaarin doona inta lagu guda jiro waraysiga luqada Hangarian ah diwaan galintaas waa in ay ka koobnataa waxyabihii ugu muhiimsanaa oo aad shegtay inta lagu guda jiray waraysiga dhamaadka waraysigaas diiwaan galinta qoraalkaan waa laguu aqrin doonaa wana laguu tarjumi donaa.

**Iska hubi qoraalka la diwaan galiyey wax walbo uu ka koobanyahay in ay saxantahay oo ay si toos ah ugu tarjumayso waxa aad shegtay inta lagu guda jiray waaraysigaada, haddii ay wax ka maqanyihiin ama ay ka qaldanyihiin horay uga sheeg masuulkaada ku waraysanaayo kaas oo saxi karo diwaan galinta.**

Kiisaska badanaa, waxaa aad u adag in laga hadlo sabaha loo waydiisto magangalyada, lakin haddii adan sheegin dhibaatooyinkaada dhabta ah inta lagu guda jiro waraysiga, masuuliyiinta ma xaqiiqsan karaan in aad u bahantahay daryeel. Waxaad kaloo waydiisan kartaa waqti gaaban haddi aad daal dareento inta lagu guda jiro waraysiga, waxaad kaloo kalmo waydiisan kartaa dhakhtarka (calim nafsiyeed) ee hay·ada lagu magacaabo Cordelia waxaad kala xariiri kartaa fiiri boga 15.

Sida aad uga hadleysowaxyaabaha ku xanuujinaayo kuwaas oo aad doorbidayso in aadan dib u xasuusan ama uusan ku waydiinin masuulkaada ku waraysanayo.

**Waxaad maskaxda ku haysaa in tarjumaanka iyo masuulka waraysiga kula yeelanayo, qareenkaada , ama adeegahaada bolsho ama qaadigaba, and ay si adag ugu qasbanyihiin wax walboo aad u shegtay oo sir ah waxna loogama sheegi doonomasuuliyiinta wadankaada hooyo (ma ahana sabatu in aad dalbatay magangalyo). Haddii ay ku sababayso arintaas dhibaato ama reerkaada dad ka mid ah ama adiga laf ahaantaada.**

Ka dib marka uu masuulka magangalyo waraysi kula yeesho, waxaa aydana macquul ah in ilaalada nabad sugida ee wadanka ayagana ay warayso kula yeshaan *(Nemzetbiztonsági Hivatal)*.

Muddada loogu **talagalay** howsha waa 60 cisho, waxaana kaloo la dheran karaa ama lagu sii dari karaa 30 cisho oo dheraad ah markii loo eego dhanka sharciga, xafiiska waaxda socdaalka badanaa waxa uu ku qataa go·aan ka in muddo ah oo u dhaxayso **45 cisho ilaa iyo 90 cisho**.

Dhamaadka howsha xafiiska waaxda socdaalka waxa ka qadan karaa 5 go·aan ee kala duwan midkooda,

- in laguu aqoonsado sharci qaxootinimu *(menekült)*
- in laguu aqoonsado daryeel farciyeed *(oltalmazott)*
- in laguu ogolaado jogitaan *(befogadott)*
- diidmo
- haddii lagu waayo inta lagu guda jiro howsha (haddi aadan adin waraysiga xafiiska waaxda socdaalka kulama soo xiriirayaan iyo wixii u dhigam) howshaadana waa la joojin donaa waana la xerayaa

Waa in aad shaqsi ahaantaaa u xaadir u ahaataa markii lagu siinayo go·aankaada tarjubaankana wuxuu ka caawin doonaa sharaxaada go·aanka, haddii lagu diido waxaa uu kuu sharxi donaa sababaha lagugu diiday.

Go·aanka **soo baxay** haddii adan ku wafaqsaneen waxaad ka qaadan kartaa go·aankaas racfaan waana in aad ugu gudbisaa racfaankaada xafiiska waaxda socdaalka **muddo 15 cisho** ah gudaheeda, ka dib markii aad heshay go·aanka. Racfaankada ayaa waxa lagaa donayaa in aad sharaxdo waxa aad ugu malaynayso in uu ku qaldanyahay go·aanka, waxaad talo waydiisan kartaa Hungarian Helsinki Committees qareenkooda haddii aad u bahantahay racfaan kala xariir boga wixii fah fahin ah 13, 15.

**Maxkamada caasimada** *(Fővárosi Bíróság)* ee Budpest ayaa go·aan ka garidoonto racfaankaada, muddada loogu tala galayna waa 60 cisho haddii loo eego dhanka sharciga, lakniin markii la fulinayo badanaa waxa ay qadataa howsha racfaanka **dhawr bilood.** Maxkamada waxay ku qasban tahay in ay **waraysi** kula yeelato si shaqsi ah, taas oo macnaheeda tahay in ay suurtagal kuu tahay in aad u sharaxdo arintaada qdiga arintada waraysiga maxkamada badanaa waxa uu dhacaa bilooyin ka dib markii aad gudbisay racfaanka. Markale waxaa aad u wanagsan **in aad latashato kalmana waydiisato qareenka** howshaan dhexdeeda.

Dhamaadka howsha racafaanka maxakamada caasimada waxaay gari kartaa 3 go·aan ee kale duwan:

- In la ogolaado racafaankaada laguuna aqoonsado qaxooti ama lagu siiyo daryeel farciyeed, ama ogolansho jogitaan.
- Qayb ahaan la ogolaado racfaankaada lana buriyo go·aanka xafiiska waaxda socdaalka, laguna amro in ay dib u egaan arintaada, ayna ku bilabaan howl cusub, aritaana waxaa laguu bilabayaa howl magangalyo oo cusub.
- In la diido racfaankaada, loona ogolaado go·aankii hore sida uu ahaa.

Go·aanka ay gaarto maxakamda waa mid kama danbays ah dibna racfaan ugama qaadan kartid.

? **Halkee baan jogi doonaa inta lagu guda jiro howsha (ay ku guda jirto howsha racfaanka).**

Waxaa siyaabo badan oo kala duwan:

— Badanaa, waxaad caadi ahaan u joogi dontaa kaamka qaxootiga ee Debrecen, meshaas oo aad ka helo doontid hooy iyo 3 xili oo cunto malin walbo.

— Waxaad kaloo habaysan kartaa degaan kuu qaas ah (tusaale ahaan haddii aad leedahay saaxiib, ama qof reerkaada ka tirsan oo ku marti galya, ama aad ka bixi karto guri kiradiisa) si kastaba ha ahatee ogu horeyntii waa in aad ka codsataa xafiiska waaxda socdaalka in uu ku ogolaado in aad joogto degaan qaas ah, si aad taasi u samayso waxaa lagaa rabaa in aad gudbiso shaado koobi ah oo cadaynayso milkilaaha gurigaas iska leh *(tulajdoni lap)* iyo heshiiska ijaarka *(lakásbérleti szerződés)* ama ogaysiis cadaynayo in uu ku siinayso kaso hooy ahaan *(befogadó nyilatkozat*).

— Haddii aay da·dada ay ka yartahay 18 sano jir oo Hangari ayasan kuu joogin wax reerkaada ka tirsan oo ka wayn oo ku daryeelo, waxaad joogi dontaa “hoyga da·yarta” ee magaalada Bicske, hoygaas waxaad ku heli doontaa daryeel goni ah.

— Qaar ka mid ah maganlayo donayaasha woo ku jiray xabsi gortii ay dalbanayaa magangalyada sababtoo ah waxay ku soo galeen xadka ama wadanka ay ku jogeen si sharci daro ah waxaa dhici karto in ay jooogi donaan xabsiga inta lagu guda jiro howsha.

**Waxaad maskaxda ku haysaa haddii aad dooratoin aad jogto degaan qaas ah wa in si toos ah lagaga helaa cinwaanka degaanka aad siisay xafiiskaa waxada socdaalaka, tusaale ahaan waxaad hubisaa in magacaada si cad oo saxan ugu qoranyahay albaabka iyo boostada guriga haddii adan helin waraaqaha xafiiska waaxda socdaalka ay ku soo diraan, waxay u melayn donaan in lagu waaye oo aa iska dhuumatay wayna xeri donaan haowshaada magangalyo.**

? **Maka tagi karaa kaamka qaxootiga ee Debrecen inta lagu gudo jiro howsha?**

Haa, waa kaam furan, balse haddii aad rabto in aad maqnaato in ka badan 24 sacadood waa im aad waydiisataa kana heshaa fasax mamaulka kaamka haddii aad ka maqnaato kaamka in ka badan hal malin fasax la·aan xafiska waxada socdaal waxa ay u malaynayaan in aad dhuumaay waana la joojin donaan howshaada magangalyo.

? **Sidee baan ku ogaan donaa xiliga iyo mesha la igu waraysan doono?**

Waxaa lagu siin donaa warqad rasmi ah oo ay ku qoran yihiiin macluumadka waraysiga dhan oo luqad hungrain ah haddii aad joogto Debrecen kaamka masuulka waraysigaada wuu kula soo xareeri donaa, wuxuuna ku wayndiin donaa aad is ku aragtaan xafiiskiisa waxuuna ku sheegi donaa, ama shegi dontaa waqtiga iyo halka ay ka dhacayso waraysiga.

Hadii aad joogto guri khaas ah, masuulka boosta ayaa ku keeni doono warqad ka socoto xafiiska waaxda socdaalka oo ay ku qoran tahay xiliga iyo mesha waraysiga ka dhici doono, haddii aadan joogin waxa uu kuu dhaafi doona, dhaafi dontaa, ogysiis yar, waxaana laga rabaa in aad ka soo qaadato xafiska boost ee kugu dhaw.

Haddii aad leedahay qareen, xafiiska waaxdka socdaalka wuu la socodsiin donaa tarikhda waraysigaada.

? **Xafiiska waaxda socdaalka waxay xirayaan howsheeda magangalyo sababtoo ah waxay u maleeynayaan in aan dhuumatay. Marka maxaad samayn karaa?**

Waxaad ka codsan kartaa masuuliyiinta in ay si wadaan howshaada, balse 3 cisho gudahooda markii la garay go·aanka xeritaanka marka sida ugu deg degta badan ee ugu macquulsan.

? **Ilaalada nabad sugida wadanka waxay rabaan in ay waraysi ila yeshaan, taasi ma waxa ay u dhigantahay in ay u malayen in aan argagaxiso ahay?**

Maya, xaq waxa ay u leeyihiin in ay waraysi la yeshaan magangalyo dalbadayaasha badanaa wa ay samayaan, taasi kama dhiganto in lagu handadayo.

? **Xaq ma u leeyahay in aan shaqeeyo in ta aan ku guda jiro howsha?**

Waad shaqayn kartaa, kaliya haddii aad jogayso kaamka kana shaqaynayso gudihiisa, kala xariir mamulka kaamka warbixin dheraad ah.

Si kastaba ha ahaato, haddii howsha magangalyada, qadanayso in ka badan sanad, sanad ka dib waxaad xaq u leedahay in aad shaqaysato xataa kamaka banaankiisa, balse haddii aad wadato ogalaasho shaqo oo muddadiisa shaqaynayso *(munkavállalási engedély)* arintaas la xariir adeedayaasha bulsho ee hay·ada Menedék ama waaxda socdaalka kaalmo shaqo, waxaad ka la xariirtaa macluumaad fiiri bogaan 15.

## 7. Xaaladaha iyo xuquuqdooda

Dhamadka howsha haddii ay tahay howshaada mid guud ah, xafiiska waaxda socodaalka wuxuu ku siindonaa daryeel Hangari gudeheeda, waxaa jiro 3 nooc oo daryeel, markii masuulka uu ku sheego go·aanka asiga ama ayada waxay ku sharxi donaana nooca daryeel ee lagu siiyey.

3 xalaad ee aad ku heli karto howsha magangalyo waxay ku sinaysaa xaquuq badanoo kala duwan, halkaan waxaabagaan soo socdo waxa lagu soo koobayaa arimaha ugu muhiimsan ee xaldahaas haddii aad qabto su·aalo dheraad ah la xariir qareenka Hungarian Helsinki Committee ama adeegayayaasha bulsho ee Ha·ayada Menedék.

## 8. Halkee baan kalmo u aadaa?

**Adeeg yadaan dhaman waa bilaash lacag la·aan ah mana u bahnid in aad wax lacag ah u dhiibto, dhamaan ha·ayadaan dhamaan waxaa la shaqeeyo tarjumaano xirfadaysan, waxaadna dhab ahaan ku xariiri doontaa luqadaada hooyo ama loqadii kale aad ku hadli karto.**

Kaalmo lacag la·aan ah ee sharciyeed (haddii aad doonaysid kaalmo ku saabsan dalabkaada magangalyo ama howshiisa) – **Hungarian Helsinki Committee** *(Magyar Helsinki Bizottság)*

- **Budapest (xafiska dhexe)**
  Cinwanka: 1054 Budapest, Bajcsy-Zsilinszky út 36–38.
  Tel/fax: 06 1 321 4323, 06 1 321 4141
  Website: www.helsinki.hu • E-mail: helsinki@helsinki.hu
  Luqadaha: Hangarian, Engriska, Faransiska, Ispanish, Talyaani.
  Marka hore balan dalbo!
- **Békéscsaba kaamka qaxootiga** / Dr. Tímea Kovács, qareen
  Tel: 06 20 496 7372
  Luqadaha: Hangarian, Engriska.
  Wuxuu soo boqda kaamka Békéscsaba asbuuciba hal mar

| | Qaxooti *(menekült)* | Daryeel farciyeed *(oltalmazott)* | Ogolaasho jogitaan *(befogadott)* |
|---|---|---|---|
| Imisa sano ayuu ii shaqaynayaa sharicgaan? | Waqti aan xadidneen, balse xaalada qaar ah masuuliyiinta way kala laaban karaan sharcigaas. | Caadi ahaan 5 sano, lakiin masuuliyiinta dib ayey u tixraaci karaan ama kala laban karaan sharcigaas, waana laguu cusbonaysiin karaa tixraaca ka dib. | Muddo 1 sano ah lakin masuuliyiinta way tixraaci karaan ama kaala laaban karaan xili hore, sharcigaan waa laguu cusbonaysiin karaa tixraaca ka dib. |
| Mahelayaa kaar aqoonsi oo hungraina ah *(személyi igazolvány)*? | Haa | Haa | Maya, balse waxad helaysaa deganaansho bini•aadanimo *(humanitárius tartózkodási engedély)* |
| Basaboor ma helayaa hadii aanan lehayn? | Haa waxad helaysaa basaboor qaxooti | Haa | Maya |
| Shaqo xaq ma u leeyahay? | Haa, wax caqabad la•aan ah sida muwadiniinta dhalatka ha ee hangariaanka | | Haa, marka hore waxaad u bahantahay ogolaasho shaqo *(munkavállalási engedély)* |
| Si xur ah ma ugu safri karaa wadamada kale ee ka tirsan midowga yurub? | Maya, badanaa waxad u bahantahay in aaad hesho fiiso, wixii fahfaahin dheerad ha kala xariir safaarada wadanka aad arabto in aadu safarto. | | Maya, haddii aad haysato basabor shaqaynaya xataa xaladaan waxaad u bahantahay in aad hesho fiiso, wixii maclumaad dherad ha safarada wadan ka aad doonayso in aad u safarato. |
| Ma keen san karaa qaybaha reerkayga Hangari? | Haa xubnaha reerka:<br>— Ninkaaga\naagtaada<br>— Caruurta hadii ay ka yaryihin 18 sano jir<br>— Walidiintaada (haddii aad tahay caruur oo reer la•aan ku ah Hangari), haddii kale kaliya kuwa walidiin dhaqala ahaan ku tiirsan (oo aan ayaga is daryeeli karin)<br>— Iyo xubanha kale ee reerka ka tirsan haddii aysan is daryeeli Karin sababo caafimaad aro jira awgooda<br>Waa in ay waataan dukuminti lagu safri karo.<br>Haddii aad ugu dacwooto reerkaada mudoo 6 bilod ah lagagama bahno in aad cadayso in aad kaalmeen karto reerkaada aad siin karto hooy iyo in ay caymis caafimaad ay ku helaan Hangari, haddii in taas xili danbe bilaawdo dacwada waa in aad soo buxisaa shuruudaas, waydiiso kaalmo adeega bulshe ama qareenka, howshana u bilaaw sida ugu degdegta badan ee ugu macquul san. | | Haa xubnaha reerka:<br>— Ninkaaga\naagtaada<br>— Caruurta hadii ay ka yaryihin 18 sano jir<br>— Walidiinta dhaqaala ahaan kugu tiirsan ku waas oo aan is daryeeli karin<br>— Iyo xubnaha kale ee reerka ka tirsan oo aan is daryeelikarin sababo cafimaad ahaan jira awgood<br>Waa in ay sitaan dukuminti lagu safri karo.<br>Waaa in aad cadaysaa in aad reerkaada daryeeli kartid oo aad hoy siin kartid una heli kartid caymis cafimaad Hangari gudaheeda, arinta dacwada waxaad kalmo waydiisataa adeegaha bulsho ama qareenkaada. |
| Ma heli karaa dhalasho hangariyaan ah? | Haa, ka dib markii aad si xariir ah u joogtid muddo 3 sanno ah waad dalban kartaa dhalashada hugari balse waxaa laga raba in aad buuxiso shuruudo dhawr ah ee kala duwan si aad u hesho markii xiligaas la gaaro waydii qareenka. | | Haa, ka dib markii aad si xariir ah u joogtid muddo 8 sanno ah. Waad dalban kartaa balse waa in aad buuxisaa shuruudo dhawr ah eek ala duwan sida aad u hesho markii la gaaro xiligaas waydii qareenka. |

- **Debrecen kaamka qaxootiga** / Dr. Orsolya Szántai-Vecsera, qareen
  Goobta: C/5 "Integrációs Ház", so galida kaamka • Tel/fax: 06 52 448 446
  Luqadaha: Hangarian, Engriska, Faransiska, Serbian
  Maalmaha shaqada: isnin, talada, arbaco, khamis – galab, jimco – subax
- **Bicske kaamka da·yarta** / Dr. Júlia Iván, qareen
  Cinwanka: Hungarian Helsinki Committe, 1054 Budapest, Bajcsy-Zsilinszky út 36–38.
  Tel/fax: 06 1 321 4323
  Luqadaha: Hangarian, Engriska, Faransiska. Wuxuu soo boqda kamka 2 asbuucaba mar.
- **Budapest garoonka caalamiga, xabsiga mudada yar** / Dr. Gábor Győző, qareen
  Cinwanka: Magyar Helsinki Bizottság, 1054 Budapest, Bajcsy-Zsilinszky út 36-38.
  Tel/fax: 06 1 321 4323
  Luqadaha: Hangarian, Engriska. Wuxuu soo boqda garoonka labadii asbuucba mar.
- **Nyírbátor xabsiga mudada yar, kaamka yarka ah** / Dr. József Dobos, qareen
  Cinwanka: 4400 Nyíregyháza, Ószőlő utca 108., III./10. • Tel: 06 70 774 8116
  Luqadaha: Hangarian, Engriska, Rushka. Wuxuu soo boqda xabsiga asbuuc walba.
- **Győr xabsiga mudada yar** / Dr. András Hajas, qareen
  Cinwanka: Böröcz Ügyvédi Iroda, 9021 Győr, Szent István utca 10. • Tel: 06 96 314 115
  Luqadaha: Hangarian, Engriska, Jarmal. Wuxuu soo boqda xabsiga asbuub walabo.

Kaalmo lacag la·aan ah waxaad ka heli kartaa (haddii aad u baanahtahay tusaale ahaan in aad shaqo hesho, meel aad seexato, ama su·aal aad qabto ama dhibaato qosaysa noloshaada ee kaamka iyo wixii la halmaala) – **Ha·ayada Menedék** *(Menedék Egyesület)*

- **Budapest (xafiska dhexe)**
  Cinwanka: 1090 Budapest, Erkel utca 13/A, földszint 5.
  Tel: 06 1 411 1710, 06 1 411 1711, 06 20 430 9919 • Fax: 06 1 411 1711
  Website: www.menedek.hu • E-mail: menedek@menedek.hu
  Luqadaha: Hangarian, Engriska, Faransiska, Serbian. Marka hore balan samayso!
- **Békéscsaba kaamka qaxootiga** / Zsuzsa Perák, qofka ku cawinaya
  Goobta: gudaha kaamka • Tel: 06 66 452 617
  Luqadaha: Hangarian, Engriska, Serbian.
  Maalmaha shaqada: isnin, talada, arbaco, khamis – subax iyo galab, jimco – subax.
- **Debrecen kaamka qaxootiga** / Éva Adóba, Anna Kerek, social workers
  Location: B/5 "Integrációs Ház", so galida kaamka
  Tel: 06 52 428 537, 06 70 331 9568 • Fax: 06 52 428 537
  Luqadaha: Hangarian, Engriska, Rushka, Yukrayn, Talyaani.
  Maalmaha shaqada: isnin, talada, arbaco, khamis – galab, jimco – subax.

Kaalmo dhaqtareed oo lacag la·aan ah (haddii aad ficneen oo caadi ahayn, haddii adan habenkiii hordi karint, haddii aad walwalayso waqiyada badanaa, haddii ay ku adagtahay in aad ka hadasho wixii lagugu soo samayey wadankii inta ad jogaty, haddii ad argagaxayso habenkii hordado ama hordo wanagsan helaynin, etc.) – **Cordelia Foundation** *(Cordelia Alapítvány)*

- **Budapest (xafiska dhexe)**
  Cinwanka: 1133 Budapest, Kárpát utca I./B, 6. emelet 24.
  Tel: 06 1 349 1450 • Fax: 06 1 239 1332 • Website: www.cordelia.hu • E-mail: cordelia@chello.hu
  Luqadaha: Hangarian, Engriska, Rushka. Xafiiskaan waxa talo ah lagama bixiyo caadi ahaan, lakin wacaad u soo wici kartaa si aad u hesho balan qabilaad ah.
  Cilmi barista Cordelia Foundation dhakhaatiirta waxa ay soo boqadaan kaamka qaxootiga Békéscsaba, Debrecen, Bicske asbuucii mar (badanaa waa malinta khamista ah).

**Qaramada midobay qaybta qaxootiga (UNHCR)**

- **UNHCR Regional Representation for Central Europe**
  Cinwanka: 1022 Budapest, Felvinci utca 27.
  Tel: 06 1 3363 060 • Fax: 06 1 3363 080
  Website: www.unhcr-budapest.org • E-mail: hunbu@unhcr.org

Kalmada ee sida tadawaca ha dadka doonayo in ay wadankooda dib ugu laabtaan (haddii aad jeceshahay in aad dib ugu laabato wadankaada ) – **Ha·ada caalamiga ee muhajiriinta (IOM)**

- **Regional Mission for Central and South Eastern Europe**
  Cinwanka: 1065 Budapest, Révay utca 12.
  Tel: 06 1 472 2500 • Fax: 06 1 374 0532
  Website: www.iom.hu • E-mail: mrfbudapest@iom.int




© Hungarian Helsinki Committee • 2008

*Funded by*

European Refugee Fund, United Nations High Commissioner for Refugees

*Written by*

Gábor Gyulai

*Translated by*

Mohammed Dahir Sheikh Mohammoud